

Guddiga Talabixinta Diiwaangelinta Yaraaneyisa ee DPS

Kulankii 7aad / Caqabadaha Diiwaangelinta Yaraaneyisa, 18kii Meey, 2022

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Soo-dhaweyn & Isxaadirin	<p>Kulamadu waxay ku bilowdaan 4ta galabnimo soo-dhaweyn iyo isxaadirin. Luuqadaha loo keenay turjubaanka ayaa la sheegay. Ka dib xasuusin guud ee heshiisyada kooxda iyo dibu-eegista ajendaha, kooxdu waxay si toos ah u gashay natiijooyinkii daraasdda oo waxay isla eegeen cusboonaysiinta shuruudo ay soo diyaariyeen dad tabarruceyaal ahaa. Intii lagu jiray kulanka 7aad, guddigu wuxuu soo bandhigay shuruudihii lagu taliyey in la horgeeyo kormeeraha. Kooxda ayaa lagu soo bandhigay jawaabihii daraasadeynta dadweynaha ee shuruudaha qoraalka. Ka dib markii la dhageystay jawaabaha, oo qaar ka mid ah la hagaajiyey, oo wax lagu daray arrimaha ka dib, kooxda ayaa markaas u codeysay heshiiskooda shuruudaha. Waxa xiga waa in la sii wado haaajinta shuruudda 3aad gaar ahaan si loo hubiyo in iskuullada jaatarka ah iyo kuwa degmadu waafaqaan habraaca ay ka wada siman yihiin.</p>
Natiijooyinka Daraasadda	<p>Daraasaddii loo diray waalidka waxaa ka soo jawaabay 165 qof. Natiijooyinka daraasadda waxaa ka soo baxay mawduucyo isku mid ah oo ahaa:</p> <ul style="list-style-type: none">● Taageerada isku-darista/kooxeynta - Waa wax macno leh oo xoogga lagu saarayo isku-darid ay bulshadu ku lug leedahay.● Isku-filnaanshaha dhaqaale ahaaneed waxay ahaayeen kuwo koobbi isu ah - Ma loo baahan yahay qeyb ahaan xal dhaqaale, miyeysan ahayn iskuulladii hoosu-dhacu haystay ama run ahaantii dhib ku qabay xagga dhaqaalaha?● Hawlgelinta bulshada - Hawlgelinta bulshadu waxay muhiim u noqon doontaa habraac kasta oo noqonaya isku-darista <p>Guddigu waxay yeeleen natiijadii daraasadda oo waxaa yaraa jawaabahooda ama walaacooda.</p>

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
<p>Shuruudaha</p>	<p>Qeybtii ugu dambeysay ee shuruudaha ayaa la soo bandhigay oo ay u codeeyeen guddiga si loo horgeeyo guddoonka iyo kormeeraha. Shuruudaha waxaa ku jiray mabaadi' hagiid ah iyo xeydaabyo ah sinnaan oo qeyb ka ahaa nidaamka xiridda/ isku-darista iskuullada.</p> <ul style="list-style-type: none"> <li data-bbox="586 365 1479 457"> <p>● Shuruudda 1aad - Iskuullo degmo oo diwaangelintu ku yar tahay</p> <p>Waa Maxay - Shuruudda 1aad waa aqoonsiga iskuullada degmada ee diiwaangelintoodu hooseyso oo aan sameyn karin barnaamijyo tayo leh iyagoo aan helin kaalmo miisaaniyadeed ama ilo dhaqaale oo dibadda uga yimaada.</p> <li data-bbox="586 737 1479 829"> <p>● Shuruudda 2aad - Aqoonsiga Horudhaca Iskuullada Degmada ee Diiwangelintoodu Yaraaneyso</p> <p>Waa Maxay - Shuruudda 2aad waa aqoonsiga iskuullada degmada ee ay hoos u dhaceyso diiwaangelintoodu ka hor intaysan gelin xaalad ah diiwaangelin aad u hooseysa.</p> <li data-bbox="586 1052 1365 1144"> <p>● Shuruudda 3aad - Iskuullada Jaatarka ah ee Dhaqaalahoodu Xun Yahay</p> <p>Waa Maxay - Shuruudda 3aad waa aqoonsiga iskuullada Jaatarka ah ee aan xal u heli karin dhaqaalahooda xun.</p> <p>Guddigu waxay soo bandhigeen shuruudaha oo ka dibna waxay u kala qeybiyeen kooxda xiriirka oo ay ka rabeen fikrado iyo hagaajin dheeraad ah. In kasta oo ay jireen walaacyo soo haray, kooxdu horay ayey uga socdeen si ay sii dhammeystiraan shuruudihii lagu taliyey.</p>

Arrimaha Mawduucyada	Qoraallo & Linkiyo
Muhiimadda & Walaaca	<p>Xubnaha guddiga waxay aqoonsadeen qaar ka mid ah tabashooyin dheeraad ah oo la xiriira shuruudaha si ay u hubiyaan in wax laga qabtay oo waa ay qorteen. Waxyaabahaasi waxay kala ahaayeen.</p> <ul style="list-style-type: none"> ● In diiradda inteeda badan la saaray isku-darista iskuullada oo aan laga welweliyn xirtaanka iskuullada. In wax badan laga faallooday shuruud kasta oo la rabay in la tixgeliyo, sida mabaadi'da hageysa ee lagu ilaalin doono sinnaanta. ● Kooxdu waxay sidoo kale aqoonsatay walaacyo ka iman kara jadwalka iyo habraaca. Waxay rabeen in ay tixgeliyaan isbeddellada ka yimaadda saadaasha ee saameynaya go'aamada aqoonsiga iskuullada. Waxay sidoo kale rabeen inay u muujiyaan kormeeraha marka uu jadwalku bilaabanayo? ● Waxaa jirta caddeyn dheeraad ah oo looga baahan yahay faahfaahinta shuruudaha iskuullada jaatarka ah iyo hubinta in ay habraaca ka siman yihiin iskuullada degmada. Hoggaamiyaha degmada waxa uu oggolaaday in uu la socdo kooxaha si loo hubiyo in shuruudaha si isku mid loogu dabbakhayo iskuullada jaatarka ah iyo iskuullada degmada.
Tallaabooyinka Xiga	<ul style="list-style-type: none"> ● DPS in ay la socoto caddeynta shuruudda iyo sinnaanta iskuullada jaatarka/degmada ● In la aqoonso dadka hadaljeedinta u sameynaya kormeeraha ● In hadaljeedin loo sameeyo kormeeraha